# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:01 AM** **Hansard No.21/5** **Kal-fadhiga 21aad fadhigii 9aad**

***06/05/2013***

***Dooda Wax Ka-badalka Xeerka Qareenda akhriska 2aad waxaa ka qeybqaatey 18 Mudane waxayna socotay hal maaliin.***

**Md. Baashe Maxamed Faarax Gudoomiyaha: -**.sideynu u balansanayan waxaa manta bilaabaynaa dooda Wax ka-badalka Qareenaa, sidaa darted Mudanayaasha ka qeybqaadanayaa ha is-diiwaangaliyaan.

**1. Md. C/raxman Cisman Caalin: - dooda** Xeerkan iyo Soo jeedinta Gudidii loo saaray ay inoo soo jeediyeen runtii si mugleh oo nuxur badan xambaarsan ay uga soo shaqeeyeen Gudidu, anigu 2 arrimood baan ku darayaa.

- Tan hore, waxa weeye arrin aan doonayo inaan saxo.
- tan kalena waxa weeye Qodobka 8aad oo aan doonayyno inaan sidiisii hore ku celino.

Mida hore, waa arrin da'da la xidhiidha Qodobka 8aad oo Gudidu ka soo dhigtey da'ada ruqsada lagu siinayo 35 iyagoo ku soo sababeeyay xaga masuuliyada, ***Markaa taas Qodobka 8aad waxaan da'da leeyahay 25 jir ha lagu celiyo*** waayo marka loo eego shareecada islamka iyo Qawaaniinta kaleba ayna dhalinyaradu Jaamacadaha kaga baxaan 25 jir iyo wax ka yar.

Tan kale ee aan doonayo inaan sixitaan ku sameeyo oo ah **Qodobka 2aad** oo ah Ruqsada Qareenada Gudiduna ka soo dhigtey "Qofna lama siinkaro hadii uu ka tirsanyahay, Goleyaashana deegaanka iyo Golaha Xukuumada, shaqaalaha Dawlada iyo Ciidamada",

**Markaa waxaan Taageersanahay Qodobka 2aad Sida Gudidu ka soo dhigtey** waayo waa Xirfad private ah madaama aanu mushahar ka qaadanin Stateka ama Golaha Xukuumada aanu ka qaadanin, xirfadiisu waa xirfad private oo waxay la mid tahay dhakhtarka Xoolaha ee Xirfadiisa u furanaya Mehered private, waxay la mid tahay Dhakhtarka

caadiga ee dadka carka siinaya ee lacagta ka qaadanaya dadka, marka maqabanayo Xeerku qofku hadaanu Mushahar ka qaadan Xukuumada waxaan ogahay Wasiirka Cadaalada inuu ka tirsanyahay Gudidda Xasuuqa oo lacag ka qaato isaguna iminka wuxuu ka hadlayaa Qareenada.

**Markaa waxaanu anigu odhanaya:-**

- Yaan la isku khaldin arrintaas Xeerku Ma qabanayo Hadaanu Xukuumada Mushahar ka qaadanin ee Wuxuu la midyahay Dhakhaatiirtaa Xirfadooda ku shaqeysanaya. Qodobka sida Gudidaasi u soo jeedisay ha loo qaato. **SECENDED.**

2. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** Shirgudoonka, Mudanayaasha iyo Marti sharafta Kale waan idin salaamayaa, marka hore anigu waan taageerayaa soo jeedinta Gudidda inyar uunbaa Mulaxadaad ku sameynayaa, horta waxaan leeyahay Qodobka 2aad inuu Xaq u leeyihiin sida Mudanaha iga horeeyay oo ahXildhibaanku Qareen wuu noqonkaro mar hadaanu Cadaaladii waxba yeelayn, sida uu dhakhtar furan karo Meherad caafimaad, waxa u diidayaa ma jiraa, oo aad baan u ayidayaa.

**Qodobka 8aad** ee da'ada isna waxaan ku raacsanahay Mudanaha iga horeeyay C/raxman, oo 35 jirkaa waan ka soo horjeedaa, oo waxaan u arkaa inaanay ku hobooneyn, shareecada islaamkana qofka qaangaadh baa loo eegaa, Dhalintii dhameyd ee Hargeysa Maamuleysay ayaynu ka dhigney 25 jir, iyaga maxaa u diidaya, Markaa Qodobka da'da waa in laga daayo 35 jirka oo lagu celiyaa 25 jir.

**Qodobka 15aad** oo loo badalay in Wasaarada Cadaalada awood u leedahay Cusbooneysiinta ruqsada, Qodobkaasi wuxuu contradiction ku yahay Qodobka 16aad oo odhanaya ruqsada Qareenka hal mar buu qaadanaya Ruqsada hadaanu sharciga jabin, Mida kale Gudi baa la sameeyay Meelahay ka imanayaan iyo awoodohooda leh iyo qaab dhismeedkooda, misna Wasaarada baa la siiyay, taasina ma haboona, anigu waxaan soo jeedinayaa Wasaarada Meesha Halaga saaro Gudida Cadaaladu oo ah Gudi jirta madaama aynaan Gudi cusub awood dhaqaale awgeed u Sameyn kareyn Gudidaa Cadaalada oo ah Gudi jirta oo Meelo kala duwan ka yimi ha bixiyaan Ruqsada ayaan soo jeedinayaa, Qodoka 15aad intaa horena ee Cusbooneysiinta Ruqsada Meesha halaga saaro Contradiction buu keenayaaye.

Gudida Faraha badan ee uu tilmaamayo **Qodobka 15aad** meesha kuma haboona, **Markaa arrintaana Gudidda Cadaalada ha loo daayo.**

**Point of order, Md. C/raxmaan Dheere,:-** Gudoomiye Mudanayashu Xeerkiidhameyst tirnaa ma haystaan, markaa Gudidan ka kooban xubin ka imanaysa Maxkamadaha 2 xubnood Qareenada, 2 Xubnood oo ka imanaysa Golahayaasha Sharci-dejinta oo isku noqonaya 7 xubnood markey isu yimadaan Wasiirka Cadaalada ayaa Wareegto ku soo saaraya oo Gudidu imtixaanaykzy qaadaa Qareenada ka qaadaa, markay ka qadaaan ayay u gudbiyaan wasiirka oo uu saxiixo Xubnaha Imtixaanka laga qaaday, awoodaana waxaa loo siiyay Cashuur buu ka qadaa Qareenada oo ah markay shaqeeyaan inay iska bixiyaan.

3. **Md. Cali maxamed Aadan:-** intii badnayd Mudanayaashii iga horeeyay baa dhameeyay oo aan ku raacsanahay, horta Gudidda Farsamada waxaan ku raacsanahay 2 xildhibaan ee iga horeeyay Md. Bukhaari iyo Md. C/raxman Dheere sidey u soo jeediyeen farsamo ahaan.

Qodobada ay ka hadleen sidoo kale waxaan ku Wafaaqsanahay **Qodobka 8aad** ee da'da oo waxaan leeyahay sidii hore **25 jirka** ha lagu soo celiyo.

**Qodobka 15aad F/1aad** waxaan leeyahay ha laga saaro, waayo wuxuu leeyahay **F/1aad** "ruqsada waxaa Cusbooneysiinaya Wasaarada Cadaalada" **F/2aad** waxay leedahay "hal marbaa la bixinayaa Ruqsada" Markaa way iska hor-imanayaan oo in laga saaro **F/1aad** iyadana iyagaan ku waafaqsanahay.

Gudidana waxaa fiicnaan lahayd in la isu eego Xeerkii hore iyo Sida **Qodobka 16aad** ay Gudidu u soo dhigtey, oo la iswaafajiyo, Markaa Qaabka Gudidani u soo dhigtey iyo sidii Xeerkii leeyahay in la isla eego weeye laakiin Xeerkii Gacanta kuma hayno oo kama hadli karno, Gudiduna dhibaato dhaqaale ayay soo kordhinaysa, Shaqa Fiicana way qabanahaysaa markaa ha la isla eego Qodobkaa iyo Xeerkii.

Waxaan ka hadli lahaa soo jeedinta Gudida, waxbaad moodaa inay dadka iska khaldan yihiin oo Xildhibaanada la soo doortey iyo shaqaalaha wax isku mida maaha oo Wasiirku waa shaqaale halka Xildhibaanada laga soo doortey oo sharciyan iyo Dastuuriyan wax is khuseeya maaha wasiirku waa shaqaale oo Madaxweyne soo Magacaabay isagaana eryi kara oo wuxu la midyahay Shaqaalaha kale iyo Ciidamada, Wasiirku wuxuu la midyaha Hay'adaha Madaxbanaan ee aynu ansixinay sida Gudoomiyaha Maxkamada Sare, Markaa Xildhibaano waxaynu ka hadlayno waa iney sharciga waafaqsanaadaan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerku sida la inoogu soo gudbiyay ayuu sax ku yahay, waana ineynu sidaa Ku ansixinaa, Wa bilaahitowfiiq.

4. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Marka hore, Gudoomiyaha, Mudahanaasha, Saxaafada iyo Marti-sharafta aad baan idiin salaamayaa, Marka labaad waxaan aad u bogaadinayaa Gudidii isku soo duba ridey Wax ka-badal iyo kaabisna ku soo sameysay Xeerkan, xilweyna way iska soo saareen.

**Qodobka 8aad** oo mudanayaashii iga soo horeeyay ka hadleen **anigu waxaan ku waafaqsanahay Sida Gudidda u soo dhigeen oo ah 35 jir**, marka loo eego Masuuliyada Sharci ee loo bahanyahay wayna adagtahay qofka Jaamacada ka soo qalinjabiyay isagoo 25 jir inuu arrin sharci markaba ka hadlo oo ka fadwoodo, sidaa darted waxaan leeyahay ninka qareen shareeco noqonayaa waa inuu ahaado mid sita ugu yaraan Machesterka oo ay ugu yartahay hadaanu sidan Digtorate, hadaanu sidan waa in la yidhaahdo waa inuu noqdaa mid shareecadu biyo dhigtey ayaan soo jeedinayaa

**Qodobka 15aad** waxay gudidu u soo dhigtey "*Waxay Wasaraddu awood u leedahay cusboonaysinta ruqsada Qareenada*" Marka Ruqsad qareen laga hadlayo, cida ugu xogta badan ee haysa xogta ninka qareenka ah haduu xunyahay iyo haduu fiicanyahay waa Garsooraha oo ogaan kara xilka uu hayo sida uu uga soo baxay, **Markaa Waxaan Soo jeedinayaa oo Xildhibaan Bukhari ku raacsanahay in Cida ruqsada bixinaysa laga dhigo Gudidda Cadaalada oo Xeer-ilaalintii iyo Garsoorihiiba ku jiraan oo ah cida gacanta ku haysa**, Garsoorkuna waa saddexdaa dhardhaar oo ah Garsooraha, Xeer-ilaaliyaha iyo Qareenka, markaa waa in meel la wada geeyo ayaa fiican.

**Qodobka 16aad F/1aad Xarafkiisa (X)** hal garsoore ayaa ku jira, Gudidda Cadaaladana Qareeno kuma jiraan oo garsoorayaal kaliya ayaa ku jiran, markaa cadaalda daro ayay noqoneysaa in la yidhaahdo Gudidii Qareenadu kuma jiraa, Markaa Gudidda Cadaalda ee 7da ah waxaan ku darayaa 3 xubnood oo Qareenada ka mid ah, Markaa farqadkale oo ah "in 3 Xubnood oo Qareenada ka mid ah" in lagu daro ayaan soo jeedinayaa.

Waxaan kaloo isla **Qodobka 16aad F/11aad** ku dari lahaa in Gudiddu madaama aanay Xarun lahayn la yidhaahdo Xarunta Ururka Qareenada

ha ku hawlgalaan Gudiddu, madaama Ururka Qareenadu Xarun leeyihiin.

**5. Md. Xuseen Maxamed Cige:-** anigu laba qodob oo gaagaban baan ka hadlayaa xeerka ina horyaala **Qodobka 2aad** ee Ruqsada Qareenada Xubintiisa 2aad oo markii hore u dhignaa "Qofna lama siin karo ruqsada Qareenimo haddii uu ka tirsan yahay Golayaasha Qaranka, Golayaasha Deegaanka, shaqaalaha dawlada iyo Ciidamada" waxay ka saareen Golayaasha Qaranka oo waxay ku badaleen "Qofna lama siin karo ruqsadda Qareenimo haddii uu ka tirsanyahay Golaha Xukuumada, shaqaalaha dawlada iyo Ciidamada **"**markaa waxaan anigu Soo jeedinayaa in sidii hore xubintani u ahayd lagu daayo oo laga saaro Wax ka badalka Gudidda**.** Xeerkaasina haduu sidaa inagu dhaafo Gafweyn inaynu galnay weeye.

**Qodobka 8aad** waxaan aaminsanahay oo aan raacsanahay in da'da laga dhigo 25 jir, waayo qofka jaamacada ka soo baxay in 25 jir lagu qaato weeye, Marka waxa weeye juniorba ahaadee in 25kaa laga dhigo ayaan soo jeedinayaa waayo hadii kale wax khibrad ah helimaayo.

**6. Md. Maxamud Jaamac Cilmi:-** Shir-gudoonka iyo mudanaashuba way salaamanyihiin, aniga waxaa ila wanaagsan in marka sidan oo kale Gudi xeer loo saaro waa inuu caawiyo La-taliyaha Sharciga si wixii khaladan shareeco ahaan uu uga saaro.

Arragtida **Qodobka 28aad** ee dastuurka ugu sareysa waxa ka horyimaada waa waxaan jirin oo waa baadil, Muwaadinku inuu helo Xuquuqdiisa shaqo waa wax waajiba dawladana saaran, Markaa halkan **Qodobka 2aad** ee ay soo qoreen oo u diideen i Wasiirada, Shaqaalaha, Ciidamada iyo Golayaasha Deegankana u diiday, Xildhibaanadii halkan fadhiyayna siinaya, dee Xuquuqda Dastuurku wuu simanyahay cidna xaquuqdeeda looma diidi karno, Markaa waxa wanaagsan in Sharcigu waafaqo dastuurka, ilaa la badalo oo labada Gole intey ka fadhiistaan aanay badalin Qodobka, Markaa **Qodobka 2aad** waa in dib loogu noqdaa oo qodobada Dastuurka ka hor-imanaya laga saaro.

**Qodobka 15aad** Gudida Cadaalda ayaa kaga xaq leh Wasiirka Markaa **halaga saaro Farqada1aad ee Qodobkan**, **Qodobka 8aad** waa in isna loo daayo 25 jirka waayo Markuu kuliyada ka soo baxo waa in lagu siiyo 25 jirkaa intaa tababar buu qaadanayaa.

**Marka waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerka halaga soo saaro Waxyaabaha Dastuurka ka hor-imanaya, La-taliyaha Sharciguna ha soo eego, intaas ayaan kaga baxayaa.

7. **Md. Xariir Siciid Bulaale: -** Qodobka odhanaya Golaha Xukuumada, Ciidamada iyo Shaqaalaha waxaan leeyahay qodobkaa sidiisii hore haloo daayo ee ahaa "**Qofna lama siin karo ruqsada Qareenimo hadii uu ka tirsanyahay Golayaasha Qaranka, Golayaasha Deegaanka, Ciidamada iyo Shaqaalaha",** waxaanan soo jeedinayaa in qodobkaa sidiisii hore loo daayo, waxaa jirta had iyo goor inay ina jiidhaan Xeer sadex nin oo inaga inaga mid ahi ay wataan.

Waxaan leeyahay umada haloo daneeyo, waxaan kale oo is dul taagayaa gudoomiyaha guddida 7 da xubnood ee lasoo magacaabayo waxaa la dooranayaa guddoomiyaha fadhiga ugu horeeya ee guddidaasi yeeshaan waxaana laga dooranayaa labada xubnood ee qareenada ah ayaa halkan ku qoran waxan halkaa kasoo jeedinayaa" **in gudoomiyahaa 7da xubnood iska dhexdooranayaan in 7da xubnoodba u sinaadaan ee aan qareenada gaar looga dhigin".**

Waxaan kale oo is dul taagayaa guddidu waxay yeelanaysaa baa layidhi qarash hawleed waxaana in lagu daraa miisaaniyada qaranka markaa **qareenadu xagay kasoo gelayaan miisaaniyada maadaama ay yihiin dad shicib ah?** Taasi waa iga dededantahay aniga meesha ay kasoo galeen miisaaniyada taas waxaa qabaa in ay tahay mid meesha ka baxsan, waxaan qabaa Xeernidaamiyaha samayntiisa inuu xaq u leeyahay **Wasiirka Cadaaladu**, waxaan leeyahay qodobadaasu waxay u baahanyihiin eegid.

8. **Md. Xamse Maxamed Gaada-Weyne:-** Waxaan leeyahay **Qodobka 2aad** aad iyo aad ayuu uga fogyahay cadaalada iyadoo aan loo eegin Distoor iyo internal regulation iyo waxkaleba toona caqliga ma gasho in Golayaasha layidhaahdo midna waa loo ogolyahay midna waa loo diidanyahay sababtu waxaa weeye ujeedadu waa mid keliya marka qofka wax loo diidayo iyadoo la leeyahay hawshaas mooyaane hawl kale ma qaban karo waxaa la diidanyahay in hawsha kale ay conform garayso raga ama halawada siiyo ama haloo wada diido.

**Waxaanan soo jeedinayaa:-**

- In **Qodobkaa 2aad** uu cadaalada ka fogyahay Golaha Wakiilada iyo Guurtida waa in iyagana loo diidaa hadii kale waa in dhamaan loo ogolaadaa.

9. **Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-** Xeerka **Qodobka 2aad** waxaan ku raacsanahay Xil: Xamse Gaada-weyne,xaga da'da qodobkii laga hadlaayey iyagana waxaan leeyahay **25 ka** halaga daayo oo **35 ka** hala dhigo ayaan leeyahay, Xeer marka la samaynayo qodobka la samaynayo ee Xeerku waa in uu saldhig leeyahay oo qodob Dastuurka waafaqsan oo lagasoo qaatay oo meel loo raaco leh iyo raad leh waa inuu noqdaa laakiin Xeer qodobo uun layska sameeyo oo aan la hubin inuu Dastuurkii waafaqsanyahay iyo inkale waa dhibaato.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - "Xeerkasta oo la samaynaayo in qodobadiisa lagu saleeyo Dastuurka Qodobka uu ka waafaqsanyahay iyo nuxurka ku jira".
   - Ta kale, nimanka La-taliyayaasha ah ee Golaha joogaa waa in ay Guddi kasoo lasoo sameeyaan Xeerarka oo kalasoo taliyaan meesha yaanay iska fadhiyine oo xilkooda gutaan taasna waan soo jeedinayaa.

10. **Md. Farxaan Maxamed Jaamac:-** Waxaan ka bilaabayaa Xeerku markuu Xeer sharci yahay marka u horaysa waxaa bud dhig u ah la taliyaha sharcigu inuu ku jiro waxbadanbaa la taliyaha sharcigu uu jideeyaa ama saxaa markaa guddida waxaa iiga dhex muuqda in latliyihii sharcigu aanu la shaqayn oo uu meesha ka maqanyahay.

    **Qodobka 2aad** oo dhigaaya cida la siinayo ruqsada qareen nimo waxaan odhan lahaa "**horta Ruqsadaani qeexid ayay u baahantahay maxay tahay marka hore waa in uu Xeerku qeexaa",** ma shaqo dawladeed baa mise waa shaqo madaxbanaan shaqadan ruqsada u baahani, hadii ay shaqo dawladeed tahay qofka dawlada ku jiraa shaqo dawladeed ma qaban karo oo dastuurka ayaa ka hor istaagey hadii ay shaqo madaxbanaan tahayna qofkasta oo muwaadin ahi wuu qaban karaa ama Gole haku jiro ama ciidamada ha ahaado wuu qaban karaa, tusaale: Saraakiisha ciidamada ee dhakhtarada ahi markay shaqadooda soo dhamaystaan ayay dhakhtar fadhiistaan oo dadka u adeegaan markaa taas ayaa qeexid u baahan.

    Waxaanay iila muuqataa "**inay shaqadani tahay shaqo madaxbanaan oo (private ah)",** taas oo qofkasta oo aqoontan lihi uu qaban karo ama ciidan ha noqdo ama shaqaale ha noqdo ama wuxuu doono ha noqdee waa shaqo private ah waxaanuu shaqadan qabanayaa xiliga uu shaqadiisii soo gutey, sidaa darteed waxaan leeyahay waa shaqo gaar ah, waxa kale oo muuqata inaanay dhamaan Xubnaha guddida ee Xeerka loo saaray aanay soo saxeexin iyo qareenkuba.

**Qodobka 8aad** oo qofka aqoonta islaamka u leh ka hadlaya, waxaan soo saaray Xeer dhalinyarada u ogolaanaya inay siyaasada kaga qayb geli karaan 25 ka, hadaan 25 ku qornay dee waa meel ka dhac in qofkii aqoonta islaamka soo bartay ee Jaamacada kasoo baaxay in lagu xidho da'ada 35 waxaa weeye cadaalad xumo, mar haduu qofku 25 jir uu maayar ku noqon karo oo masuuliyada intaa leeg uu qaadi karo waxaan leeyahay da'daa haloo daayo **25 jir.**

**Qodobka 13aad faqradiisa 6aad,** ee layidhi qofbaa la xidhay Xeerka qof lama xidho mar hadii guddi ay yihiin si kasta halagu xulee, waxaa weeyaan guddidu iyagaa is yaqaan oo **guddidaas ayaa laga dhex dooranayaa** qofka gudoomiyaha u noqonaya waxaan leeyahay taas sidaa haloo daayo, cida ruqsada ka qaadi karta marka uu aqoonyahan kani meel ka dhaco kuma qorna Xeerka, miyaa la xidhayaa **siduu ruqsada ku waayayaa kuma qorna Xeerkan**, tan layidhi xagay ku shaqaynayaan **waxaan leeyahay Xafiiskooda ayay ku shaqaynayaan,** halkan layidhi guddida dhaqaalaha ayaa miisaaniyada loogu darayaa waxaan ku bedeli lahaa waxaan leeyahay **kiis kasta oo ay galaanba qarash halooga jaro oo halooga sameeyo.**

11. **Md. C/kariin Aw Cali Shabeel:-** Waxaan jecelahay inaan is dul taago qodobka 2aad Ruqsada diiwaan gelinta qareenada waxaan aad u adkaynayaa in sidii horeba ugu qornayd Xeerka **" Qofna lama Siin karo ruqsada Qareenada hadii uu ka tirsanyahay Golayaasha Qaranka, Golayaasha Deegaanka, Shaqaalaha Dawladda iyo Ciidamada"** waxaan adkaynayaa in sidii hore loo daayo oo ahayd **" in ay dhamaanba ka reebantahay qareen inuu noqdo Golayaasha qaranka oodhan Xubnaha ka tirsani Ciidamada iyo Xubnaha Deegaanka"** sababtoo ah qofka qareen noqonayaa Saacadaha shaqada ee aynu halkan fadhino waxaynu ognahay wakhtiyada la shaqeeyaa inay gelinka hore tahay oo aanay marnaba suura gal ahayn in labadaa shaqo laysku hayo oo miduunbaa dayacmaysa weliba waxaa dayacmaysa tii uu qaranka u hayey hadaynu nahay golayaasha qaranka.

    Waxaan kale oo isdul taagayaa **Qodobka 8aad** oo ah **Da'da** ruqsada lagu bixinayo Qareenimada, waxa aad moodaa inaan Xeerkan lagasoo fiirsan sababtoo ah 35 sano wax kayar marka la leeyahay lama siin karo waxaan qabaa in ay taasi tahay Dulmi iyo xaqdaro aad iyo aad u weyn hadaynu sidaa ku deynona in jiilal dhan oo wadanka kaalin ka geli lahaa in meel lagaga dhacay oo xakame lagu qabtay sababtoo ah qofka goorma ayaa khibrad helayaa hadaanu 25 ku bilaabin?, Markaa waa in 25 jir laga dhigo.

    **Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Anigu waxaan aamin sanahay in Xeerka dib loo celiyo, oo la soo saxo.

**12. Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** Runtii guddidii si wanaagsan ayay ugasoo shaqeeyeen Xeerka qodobka 2aad ee ah **" Qofna lama Siin karo ruqsada Qareenada hadii uu ka tirsanyahay Golayaasha Qaranka, Golayaasha Deegaanka, Shaqaalaha Dawladda iyo Ciidamada"** runtii sida dastuurku qoraayo xuquuqda dadku waa isku wada mid markaa waxaan taageersanahay qodobkaa hore ee kor ku xusan.

tan labaad qodobka mudanayaashu inta badan ay ka hadleen ee **"Ruqsada qareen nimo qofka lasiinayo waa in aanay da'diisu ka yaraan 35 jir",** inbadan ayaan qodobkaa hore uga doodnay maadaama dhalinyaradu noqdeen dad aqoon yahano ah nin aqoon yahan ah oo 25 jir ah in la xadido oo layidhaahdo 35 runtii taas waan kasoo horjeedaa waxaanan ayidsanahay in 25kaa loo daayo sidaan hore ugu ansixinay Xeerkii Golaha Deegaankaba.

**Qodobka 16aad F/6aad** oo odhanaya **" Guddoomiyaha Guddidu wuxuu noqonayaa 2da qareen mid kamid ah",** waxaan leeyahay **" maaha in loo cayimo qofka guddoomiyaha guddida noqonaya ee waa in ay yagu dhexdooda iska doortaan".**

tankale ee ah **" Guddida ruqsad bixinta Qareenada",** runtii guddidu waxay ka koobnaanaysaa 7 xubnood oo **Laba xubnood** oo uu soo magacaabayo Wasiirka Wasaaraddaa Cadaaladu oo uu midkood yahay Agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda kuwaasoo labadii sanaba mar la soo magacaabayo **Laba xubnood** oo ka kala imanaya labada Gole ee Baarlamaanka (Wakiilada, Guurtida), oo ay soo magacaabayaan shirguddoonada labada gole labadii sanaba mar Hal **garsoore** oo ka tirsan Maxkamada Sare oo uu soo magacaabyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare labadii sanaba mar.

**13. Md.Cali Obsiiye Diiriye (Cali –gebiley):-** Waxaan ta'kiidin lahaa **Qodobkaa 2aad** hadii aan maanta dastoori ka dhigno in nimankaasi qareen noqon karaan waxaa dhici karta in uu qodobkaa kuu cuskado oo mudanuhu Golaha iskaga maqnaado maadaama aad u jideysey shaqo kale inuu qabsado waxaanuu odhanayaa maanta waxaan leeyahay Kiis, waxaa kasii daran ninka ciidanka ku jira ee dagaalamaya oo layidhaahdo wuxuu noqon karaa qareen waxay taasi sababaysaa inuu ciidanka iskaga yimaado **"waxaan leeyahay markaa qodobkaa haloo daayo sidii hore ee ahaa looma ogola qolona",** waayo ninka shaqo haya shaqo kale yaan loo dul dhigin hadii kale taas ha doonto oo dee shaqadan hayska daayo.

Mar labaadka, maadaama aan shaqo abuur iyo dhiiri gelin ku jirno hadii maanta la yidhaahdo qareenka 35 halaga dhigo waa mushkilad markaa taasna waxaan leeyahay **25** haloo daayo si dhalin yartu ay shaqo u hesho, Qodobka kale waxaa nasiib daro ah todoba nin oo guddi ah in aynu halkan ka nidhaahno shaqo looma ogola oo laba kamid ah ayaa guddoomiyuhu u xidhanyahay ma haboona markaa waxaan leeyahay "**Todobada Xubnood ciday iska dhex dooranayaan iyaga ayay u taalaa",** waana in aynaan u cayimin.

14. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac**:- marka hore waxaan salaamayaa Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafada, hadaan u soo noqdo Xeerka **Qodobka 2aad** oo ah *"Qofna lama siin karo ruqsadda Qareenimo haddii uu ka tirsanyahay Golaha Xukuumada, shaqaalaha dawlada iyo Ciidamada"* Marka Ma jiraa Qodob sidaa leh oo odhanaya Golaha Xukuumada, Deegaanka, Shaqaalaha iyo Ciidamadu Hadii qodob dastuuriya uu sidaa leeyahay wax laga doodo malaha, Gudidii loo saaray Maanay Dastuurka u soo eegin Xeerka markay soo qorayeen.

**Waxaan soo jeedinayaa Markaa:-**

- Anigu hoos xeerka u sii galimayo, waxaan ka hadlayaa uun **Qodobka 2aad** haduu dastuurka ka soo horjeedo waa in laga saaro, hadaanu dastuurku diideyna waa in loodaayo.

15. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-** Marka hore, Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, dhowrmeelood oo dooda Mudanayashuna tabatay kana mida soo jeedinta Gudida baan ka hadlayaa, **Qodobka 2aad** aslan marka xeer la sameynayo waxaa lagama maarmaan aha inay jirto mashaakil lagu dawaynayaa Qodob Dastuura oo aan diideyn waa inuu jiraa, aynu tilmaamno marka hoe Qareenimadu waxay tahay, Ma xilbaa mise Waa Xirfad, haday noqoto Xil Waxaa Dastuurka inoogu qoran Xildhibaanku Xilkale ama 2 xil maqaban karo, waxaynu hubnaa inaanay xil ahayn oo ay Xirfad tahay.

Sida aan loogu diidikareyn Wasiirka wasaarada Caafimaadka inuu yeesho Dhakhtar baan loogu diidikareyn in qofka Golahan Fadhiyaa inuu furto Xafiis uu Xirfadiisa kaga shaqeeyo, Wax saameyna kuma laha Xildhibanku Cadaaladii, waa inay jirtaa Qodob aad adeegsanayso markaad diideyso, Wasiirka waxaa u diidaya oo gacanta ku hayaa

Miisaniyadii, wuxuu kaloo Gacanta ku hayaa Ciidamadii intaas oo dhan baa u diidaya.

Dastuurku wuxuu leeyahay Xildhbaanku waa loo wakiilan karaa dacwad, markaa hadii loo wakiilan karo maxaa loogu diidayaa, ilayn qareenimaduba waa wakaalade, Wax awooda oo uu ku leeyahay Garsoorka iyo maxkamada Xildhibaanku ma jirto oo soo jireen bayahayd waynuna ognahay.

Waxaan leeyahay soo jeedinta Gudidu soo jeedisay ee Ciidamada, Xukuumada Wasiirka ka mid ah awood bay gacanta ku hayaan, laakiin Xildhibaanka ka tirsan Golayaasha Sharci-dejita marka uu hor taaganyahay Maxkamada Xildhibaanku wax uu dheeryayahay mar jirto. sidaa darted waxaan leehaya Soo jeedinta Gudida sax bayahayd oo waan taageersanahay.

**Qodobka 8aad** waxaa ina horyaala laba arrimood oo kala ah inaynu qof aan qaangaadhin aynu fasaxno oo dhibaato dadka u keenaya iyo inaynu qof hawshii qaban karaya gacmaha ka xidhno, labadaa mukhkiladood baa jirta, dadka da'daa wax ku qaban kara 1% bay bulshada ka yihiin, Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa da'adaa **30 laga dhigo** oo 5taa sano khibrad ku helo.

**Qodobka 15aad F/1aad** cusbooneysiinenta Ruqsada waxaa awood u leha Wasiirka Cadaalada ayuu leeyahay **Qodobka 16aad** bixinta waxaynu siinay Gudidda, wasiirku saxiix buu leeyahay oo ruqsda cidii bixisay baa cusbooneysiisa, sidaa dartee, **F/1aad** ee Qodobka halaga saaro oo sida Qodobka 16aad ha lagu dhaafo.

Xaga Xubnaha Gudidda, Gudiddu waxay ka shaqeynaysaa oo anshaxa marinaysaa Qareenada, markaa haday anshaxa marineyso Qareenada waa inay noqotaa cid garanaysa hawsha uu hayo qareenku oo aqoon u leh, halkan waxay ku leeyihiin 2 xubnood oo kaliya, Wasaarada waxaynu siinay 2 xubnood, markaa Wasaarada Agaasimaha garanay xubinta kale maxay qabanaysaa, sidaa darted xubinta 2aad ee Wasaarada Qareenada haloogu daro, Wasaaradana hal xubin loo daayo.

Waxaynu ka hadlaynaa waa dawlad maaha, waa urur Xirfad layaal leeyihiin, Halkan waxaynu ka ansixinay Miisaaniyada Cashuurta ku

waajibaysa liisanka qareenka waxaynu nidhi milyan iyo laba boqol (1,200,000) waxaan weydiiyay ururka dhakhaatiirta oo ku idhi ninka dhakhtarka ah waxaa laga qaadaa Cashuurta liisankiisa, waxay yidhaahdeen 300,000 sh/sl baa laga qaadaa, Qareenku maba qaadi karo 1,200,000 sh/sl, wuxuna waa urur xirfadle ee maaha mid Urur dawliya, madaama aynu dhiseyno urur Xirfad leh.

Maanta aduunka kama jiraan Shuruuc odhanaya ninka xildhibaanka ahi Qareen ma noqon karo, hadii lahelo xeer odhanaya Xildhibaanku ma noqon karo oo ma jiro, ururka dawladu ma laha ee awooda ururkaa leh, dawladuna liisankey leedahay. **Markaa Qodobkaa Qareenada waa lagu daraa Xubinta labaad ee Wasaarada. Intaas ayaan intia Gudidda ku darayaa,** Gudidduna aad bay u mahadsanyihiin.

**16. Md. Axmed Cabdi Jaamac (Kijaandhe):-** Doodii saaxiibkay Maxamed Jaamac aad ayay ii gashay laakiin hadana waxaan is weydiinaayey maxaynu ku diidaynaa kuwan kale ee Ciidamada ah ee Shaqaalaha dawlada ah ee Golayaasha Deegaanka ah?, halkaana waan fahmey oo Maxamed ayaa cadeeyey waa sax weeye, waxaana loo baahanyahay in arinkaa laga baaraan dego.

**Qodobka 8aad** ee Da'da runtii Mudanayaashii yidhi 25 halagusoo celiyo waan waafaqsanahay waxaan kale ee ku ladhi lahaa in Ruqsada ninka Qareenka sharciyada waa inuu jaamacad kasoo baxay caynkaas iyo caynkaas ah oo shahaado noocaasa sitaa, tababar noocaasana soo qaato shuruudahaas, waxaan leeyahay shareecada laftigeeda waa in aynu ku xidhnaa, Runtii guddian ula jeedo ayaa loo sameeyey waxaana loo sameeyey in laga ilaaliyo dawladu in ay gacanta geliso nidaamka Garsoorka taas ayaa loo sameeyey, markaa runtii inay anshaxooda ilaaliyaan inay ruqsada ka qaadaan in waxaas oo dhan waxaa weeye hawshooda.

Dawladuna waa in ay kaalin ku yeelataa ama ay cusboonaysiisa ama ay diiwaan gelisaa, waxaan odhan lahaa qodobkaa cusboonaysiinta ninka yidhi mar uunbaa la siinayaa Ruqsada waxay taasi tahay sidii aan ku heli lahayn garsoorayaal waal waalan oo kale, waxaa weeye qofka caafimaadkiisa labadii sanoba mar in la eego, Garsooruhu haduu laba sano ka maqnaado shaqada waa in laga qaadaa Ruqsada, markaa macquul maaha maalin inta la siiyo ayuu weligii sidanayaa tan guddoomiyaha waxan odhan lahaa " in **guddida iska dhex doorato Gudoomiyeheeda".**

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan aan ka baaraan degno oo guddi kale haloo saaro.

***17.*** **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** Waxaan isu taagayaa **Qodobka 2aad** oo aad looga hadlay sababo badan oo taageersan sidii markii hore loosoo diyaariyey waala sheegay, waxaan Guddoomiye is weydiinayaa *"Ninka Xildhibaanka ah ama Ninka Shaqaalaha ah ama Ciidamada ha ahaado meeshuu doono ha ahaadee Qarankana Mushahar ka qaata waxaa jira saacado qasab ku ah inuu hawsha qaranka guto oo fuliyo waxaanay ka bilaabmaan 7:00 aroornimo waxaanay dhamaadaan 2:00 gabalnimo intaa inta ka dhaxaysaa waa duty waajib ku ah qof kasta oo mushahar ka qaata Qaranka".*

Waxaa jira Wasiiro iyo Dhakhtaro shaqo dheeraad ah qabta aan isweydiino ma waxay shaqadaas qabtaan saacadaha xaqa loogu leeyahay mise waxay qabtaan saacadahaas kadib?.

Anigu waxaan leeyahay hadii qareenada ku jira Golayaasha sharci dejinta ama ku jira Golayaasha Deegaanka hadii ay hawshaasi qabanayaan iyaga iyo cidii kaleba saacadaha xaqa loogu leeyahay wixii ka baxsan ha laga horjeedsado oo laga doodi karo maaha, hadiise ay tahay shaqadoodu Qareenimo mid qabsoonta saacadaha shaqada laga doonaayo ee ah Aroornimada 7-2:00 ay tahay xaq uma laha inay tay ku qaataan mushaharka ay ka tagaan oo Qareenimo doontaan, sidaa awgeed waxaan raacsanahay Qodobkii hore loosoo jeediyay ee ka reebista ahaa.

Tan Ruqsada waxaan soo jeedinlahaa in labadii sanoba mar dib loo eego sidii Xildhibaankii iga horeeyay sheegay, Ta Da'da , qof da' yar oo ilaahay Cilmi iyo Aqoon siiyey oo dadka wax ka hor arka waxaa ka dhiman khibrad hadana, markaa waxaan soo jeedinayaa si ay Xeegona Xeego u noqoto Ilkana u nabad galaan, sidii uu ku taliyey Xildhibaankii iga horeeyey in aan 30 sano ka dhigno

Waxaan u imanayaa guddida Qareenada ee 7da Xubnood ah waxaan raacsanahay tii ahayd qofka labaad layidhi hasoo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamada Sare qofkaasi in aanu Garsoore ahaan ee laga dhigo Xubin kamida Qareenada oo ay sadex noqdaan**.**

**W**axaan kale oo raacsanahay **Guddoomiyaha doorashadiisa inaan cid loo xidhin ee tartanku uu ka dhexeeyo todobadoodaba** ama hays garabsadaan ama ninkale hasiiyaane.

**18.   Md. Maxamed Jaamac Cali:-** Waxaan taaban lahaa **Qodobka 2aad** habka ay shaqadu u kala taalo waxaa ugu horeeya marka xilka Qaranka la eego Madaxweynaha, Mudanayaasha, Wasiirada mudnaanta ay leeyihiin, qodobkii ugu sareeyey oo ah Golayaasha Qaranka oo ah Golihii Wakiilada, Guurtidii iyo Golayaashii deegaanka ayaa waxaa la leeyahay haloo fasaxo shaqooyin dheeraad ah taasi waxay meesha ka saaraysaa shaqadii uu haystey.

Markaa waxaanan leeyahay **Qodobkaa sidiisii hore haloo daayo** hadii kale aynu u wada fasaxno cidkastaba dhamaan muwaadiniinta, wakhtiga shaqada ee dawladu waa wakhtigaa uu sheegay Ibraahim,waxaa halkan waxa ku jira mushahar loo qoro Qareenadan oo loogu daro budget ka dawlada mar hadii ay budget ka kana ku darsanayaan waa gef weeyaan.

**Qodobka 6aad** ee sidiisaba laga saray waxaan u arkaa Qalad, Qodobka sideedaad 25 kii aan shalay qoray haloo daayo, Qodobkaa awooda Wasarada Cadaalada ee la baabiiyey waxaan leeyahay sidiisii haloo daayo, Guddida 7da Xubnood waxaan leeyahay iyaga ayaa xor u ah cidii ay guddoomiye u dooranayaan, waxaanan leeyahay taa mushaharka guddidani ma yeelan karaan mushahar gaar ah.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-----------------------------------------